# Ku sahabsan dugsiyada barbaarinta ee Uppsala

Dugsiyada barbaarintu waa marxalada koobaad ee nidaamka dugsiga Iswidhiska ah. Dugsiga barbaarintu waa mutadawacnimo waxaana heli kara dhamaan caruurta u dhaxaysa 1 iyo 5. Gaynta cunugaaga dugsiga barbaarintu waa qaab wanaagsan oo aad ugu diyaarin kartid cunugaaga waxbarashada waajibka ah. Dugsiga barbaarintu wuxuu ka caawinayaa cunugaagu inuu horumariyo luuqadiisa. Inta ugu badan caruurta joogta Sweden waxay dhigtaan dugsiga barbaarinta.

## Tani waa sida dugsiga barbaarintu u shaqeeyo

- Dugsiga barbaarintu wuxuu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha inta lagu jiro maalintii.
- Dugsiga barbaarinta, cunugaagu wuxuu helayaa quraac, qado iyo nusasaace.
- Ka dib qadada, cunugaagu wuu nasan karaa ama seexan karaa haddii uu u baahdo.
- Dugsiga barbaarinta, cunugu wuxuu ku joogaa labadaba dibada iyo gudaha. Cunugu sidaasi darteed wuxuu u baahan doonaa dhar ku haboon cimilada maalinta iyo xilliga, sida dharka roobka markuu roob da'aayo iyo dharka diiran ee jilaalkii wakhtiga jilaalka.
- Iyadoo weheliyaan caruurta kale, cunugaagu wuu, tusaale ahaan, heesi karaa, wax sawiri karaa, jaasi karaa, qori karaa una hadli karaa (labadaba luuqadiisa hooyo iyo luuqada Iswidhishka).
- Macalimiinta dugsiga barbaarinta iyo kalkaalisada caruurtu waxay ka shaqeeyaan dugsiga barbaarinta.

## Goormuu cunugaagu ka qeybgali karaa dugsiga barbaarinta?

Cunugaagu wuxuu ka qeybgali karaa laga bilaabo da'da 1, haddii adigu waalid ahaan aad shaqeynaysid, raadinaysid shaqo, baranaysid wax ama aad ku jirtid fasax waalid oo aad ku nooshahay Uppsala. Goobta cunuga ee dugsiga barbaarintu waa lacag. Waxay la mid tahay kharashka aadista deegaanka sida dugsiga gaarka ah ee barbaarinta oo kale. Kharashka gaynta cunugaaga dugsiga barbaarintu wuxuu ku salaysan yahay dakhliga qoyskaagu haysto.

### Dhamaan caruura da'da 3 waxay xaq u leeyihiin dugsiga barbaarinta

Marka cunugu gaadho 3, isaga ama iyadu wuxuu xaq u leeyahay inuu aado dugsi barbaarin oo dawladeed. Tani waxay sidoo kale khusaysaa, haddii adigu waalid ahaan aanad shaqeynayn, raadinaysid shaqo, wax baranaysid ama aad ku jirtid fasax waalid. Dugsiga barbaarinta dawlada macneheedu waa in cunugaagu dhigto dugsiga barbaarinta 15 saac todobaadkii oo dugsiga barbaarintu bilaash yahay.

Postadress: Uppsala kommun, 753 75 Uppsala
Telefon: 018-727 00 00 (växel)
www.uppsala.se

**Ku sahabsan dugsiyada barbaarint ee furan**

Waxa jira dhowr dugsi barbaarin oo ka furan Uppsala. Ka hor intaan cunugaagu bilaabi dugsiga barbaarinta, adiga iyo cunugaagu waxaad wada iman kartaa dugsiga barbaarinta. Dugsiga barbaarinta ee furan waa bar kulameed loogu talogalay waalidka leh caruurta ah 0-5 sano jir. Halkaasi caruurtu way ku ciyaari kartaa oo adiguna waalid ahaan waxaad la kulmi kartaa waalidka kale. Dugsiga barbaarinta ee furan waa bilaasha umana baahnid isdiwaangalin. Macluumaad badan waxa laga heli karaa iyadoo la baadhayo kalmadaha dugsiga barbaarinta furan ee uppsala.se.

## Tani waa waxa ay tahay inaad sameysid haddii aad rabtid in cunugaagu bilaabo dugsiga barbaarinta.

- Waxa jira ikhtiyaaro labadaba dugsiga barbaarinta dawlada iyo dugsi barbaarin madaxbanaan (gaara), oo waxaad codsan kartaa dugsiga barbaarinta aad doorbidaysid. Adigu waalid ahaan waxaad raadinaysaa goob adeeg loo yaqaan eBarnUngdom. Waxaad ka raadin kartaa kalmada ebarnungdom halka uppsala.se.
- Waa inaad codsataa dugsiga barbaarinta ugu yaraan saddex bilood ka hor intaanad go'aansan in cunugaagu bilaabo. Waxa ka reeban haddii aad rabtid in cunugaagu bilaabo bisha Ogos, ka dib waa inaad codsataa afar bilood ka hor.
- Haddii aanad haysan lambarka diwaangalinta qaranka ama aanad rabi inaad isticmaashid adeega intarnadka, waxaad ku codsan kartaa adoo buuxinaya foomka warqada.

## Haddii aad uga baahan tahay caawimo codsashada dugsiga barbaarinta, waxaad sameyn kartaa kuwan soo socda:

- Si aad isku diwaangalisid, booqo soodhaweynta dadka imanaya ee cusub Hoolka Magaalada Stadshusgatan 2. Kuwa ka shaqeeya halkaasi ayaa kaa caawin doona inaad isdiwaangalisid oo aad ku codsatid dugsiga barbaarinta foomka. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, way kuu diyaarin karaa. Waxay furan yihiin Isniinta iyo Arbacada laga bilaabo 9:00 ilaa 11:30, iyo Khamiisaha laga bilaabo 13:00 ilaa 16:00.
- Haddii aad uga baahan tahay caawimo codsashada dugsiga barbaarinta dhanka dhijitaalka oo aad leeyahay lambarka diwaangalinta qaranka Iswidhiska ah, Aqoonsi Bangi oo moobil ah ama akoon Uppsala oo adeega Dawlada hoose ee eBarnUngdom, waxaad booqan kartaa Xarunta Xidhiidhka. Waxay kaa caawin kartaa inaad codsatid dugsiga barbaarinta. Waxay ku yaalaan Hoolka Magaalada ee Stadshusgatan 2. Waxay furan yihiin arbaco kasta inta u dhaxaysa 08.00-17.00, iyo Khamiisaha 08.00-18.00.
- Ka wac dawlada, 0771-727 001. Tilifoonkaaga waad ka dooran kartaa, ka dib dooro 1 oo weydii su'aalaha khuseeya codsiga iyo badelista dugsiga barbaarinta. Saacadaha tilifoonadu waa Isniinta ilaa Khamiista 09.30–11.30.
- Ka wac Soodhaweynta dadka cusub ee imanaya 0771-727 001. Tilifoonkaaga waa inaad ka dooratid, dooro kadib 6. Saacadaha tilifoonku waa Isniinta ilaa Arbacada 09.30–11.30.